# Xaqiiqada COVID-19:
## Joogidda Guriga Badqabid Awgeed

### Sababta ay joogidda guriga muhiim u tahay

Tallaabbooyinka difaacidda ah sida joogidda, jirka oo la kala fogeeyo, and xirashada gafuur-xir waa waxyaabaha ugu fiican ee lagu "yareyn karo xanuunka faafaya" Inta uu socdo xanuunka nagu dillaacay ee COVID-19, dad badan oo hal mar xanuunka is-qaadsiiya ayaa jahawareer ku keeni kara isbitaallada iyo kilinigyada.

### Waxa Aad Sameyn Karto si aad u Difaacdo Naftaada iyo Qoyskaaga

Badqabidda kuugu fiican waa adigoo guriga jooga.

- Markaad bannaanka u soo baxdo, gafuur-xir ama maro la mid ah waa inaad wadato, oo aad dadka kala fogaataan. Taas macnaheedu waa in aad dadka ka fogaato ugu yaraan lix fiit.
- Ku dedaal in sababta aad bannaanka u aadeyso ay noqoto waxyaabaha muhiimka ah, sida in aad soo qaadaneyso cunto ama daawo.
- In aad hawada u baxdo iyo luga-baxsiga waa wax kuu fiican! Keliya waa in aad ka fogaato ciyaaraha kooxaha ee la isku dhawaado -- lugee ama baaskiil kaxeyso!

